# Jidadka Laamaha

Dhinacaaga bidixda waxaa ku yaal dagaandaga tartiibka ah kuu hogaaminayo bilaabista doonta gacanta lagu qaado iyo marinka xeebta. Jeexyada dhagaxaanta ee laga soo badbaadiyay Elliott Bay ayaa loo isticmaalay in lagu dhiso jaranjarooyinkaan iyo ku joogsashada dhagaxaanta hoose. Qaababka cad ee wareegsan ee sagxadooda ayaa muujinayo cadeynta nolosha xayawaanada badda sida gooryaanka dhagaxaanta, oo mar un ku koray halkaas. Toos ugu sii soco biyaha si aad u gashid taalada. Waxaa ku wareegsan wabiga, waxaad la kulmeysaa aragtiyada qulqulka kore iyo hoosaba. Si kasta oo aad u tagto, gelitaanka dadweynaha ayaa ku xira bini'aadamka dhulka iyo biyaha.

## Biyaha Shaqada ku jiro

Nolosha meesha biyaha ku kulmaan waxay ku xirantahay dhaqdhaqaaqa biyaha. Tan waa meesha laga marag kacayo isbedelada ay hirarka keenaan, dhaqaajiyaan oo qulqulaya wakhti ka dib. Dagaandagyada iyo dariiqyada dhulka waxay u ekaadaan xeebta taariikhiga ah ee webiga markaas biyaha way soo geli karaan oo ka bixi karaan. Hirarka sare waxay ku daadayaan hoosta buundada cagta. Caafimaadka deegaanka wuxuu si dhow ugu xiran yahay xaaladaha biyaha firfircoon. Dhirta kala duwani waxay ku koraan xaddi kala duwan oo biyo ah. Geedka miraha cad iyo geedka ubaxa sida ciidda qalalan ee dagayga. Cowska ubaxa iyo cowska qunjada waxay doorbidaan xidido qoyan. Waxay ka koraan dhul biyoodka u dhow webiga. Caleenta dhirta badan ee deegaanka ee halkaan ka baxda waxay ku daabacanyihiin dariiqa shubka ah.

Biyaha ayaa sidoo kale ku xiran dadyowga xoolaha faa'idada u ah. Cayayaanka ayaa soo jiito qoyaanka oo waxay siisaa illaha cuntada ugu muhiimsan oo kalluunka, shimbiraha iyo duurjoogta kale. Cayayaanka yar laakin weyn ee Copepod, oo magaceeda loola jeedo "oar feet." Cayayaankaan benthic (wabiga hoose) dhererkiisa waa 5-15mm oo wuxuu ka dhigaa hoygiisa dhoobada meesha biyaha ku kulmaan. Waxay cagaheeda ku jeexdaa wasakhda, taasoo u keeneyso ogsijiin ciidda oo waxay ka sifeysaa sunta biyaha.

